# Siyaasadda Helitaanka Adeegyada ee Dadka Naafada ah

Waaxda Garsoorka ee Gobolka Maine ma ogolo wax takoor ah nooc kasto ha ahaadee oo ka dhan ah dadka naafada ah. Takoorka ka dhanka ah dadka naafada ah wuxuu xad gudub ku yahay xuquuqda madaniga ah ee dadka, wuxuu hoos u dhigayaa daacadnimada nidaamka maxkamadda iyo goobta shaqada, wuxuuna si xun u saamaynayaa dabaqaada siman ee cadaaladda. Intaa waxaa dheer, adeega xeerbeegta waa xaq iyo masuuliyad saaran muwaadiniinta u qalma oo dhan.

WAA SIYAASADDA Waaxda Garsoorka ee Gobolka Maine in:

- Barnaamijyada, waxqabadyada, adeegyada, iyo xarumaha nidaamka maxkamadda wuxuu ahaan doonaa mid si buuxa ay u heli karaan dadka naafada ah, sida required by xaqa iyo cadaaladd iyo sida uu qeexayayaan shuruucda kala ah Sharicga Dadka Maraykanka ee Naafada ah, Sharciga Dhaqan-celinta ee sanadkii 1973 iyo Sharciga Maineee Xuquuqda Aadanaha;
- Shaqaalaha nidaamka maxkamadda waxay siinayaan adeeg degdeg ah, edeb leh oo loo siman yahay dadka oo dhan oo ay ku jiraan kuwa naafada ah wayna soo sheegayaan dhacdo kasto oo takoor ah oo ka dhan ah dadka naafada ah;
- Fusadda adeega xeerbeegta loo ma diidayo lagamana xadidayo dadka naafada ah;
- Cabashooyinka takoorka ku saleysan naafanimada isla markiiba waa ka jawaabi doonaa dadaal kastana ayaa la samayn doonaa si loo xaliyo cabashooyinkaas oo dhan sida ugu dhakhsaha badan;
- Dadka shaqa doonka ah oo u qalma shaqada laguma sameen karo takoor ku saleysan naafanimada marka ay soo gudbiyaan codsiga shaqada; sidoo kale lama ogolo wax takoor ah in lagu sameeyo shaqaalaynta, horumarinta, racdeynta shaqaalaha, tababarka shaqada; magdhow shaqaale; ama shuruudaha, xaaladaha, mudnaanta shaqada; iyo
- Dhamaan shaqaalaha Waaxda Garsoorka waxay heli doonaan tababar shaqo si ay u yeeshaan awood ku filan gudashada waajibaadkooda ku xusan siyaasaddaan iyo si ay u muujiyaan dareenkooda ku aaddan baahida dadka naafada ah.

Si loo hormariyo siyaasadahaas Waaxda Garsoorka waa inay dhaqan galisaa qodobada soo socda:

1. **Galitaanka Xarumaha Maxkamadda:**

Waaxda Garsoorka ee Gobolka Maine waxay aqoonsan tahay waajibkeeda ah inay fududeyso galitaanka xarumaha maxkamadda iyo inay tilmaam ka bixiso meelaha soo socda ee mudnaanta leh si loo fududeeyo galitaanka muddada ku meel gaarka ah inta laga gaarayo qaab galitaan buuxa lagu heli karo:

   - Jidadka laga soo galo, albaabada laga soo galo, meelaha gawaarida la dhigto.

- Xafiisayada karaaniyada, oo ay ku jiraan daaqadaha adeegyada dadweynaha.
- Qolalka maxkamadda.
- Madasha wadatashiga guddiga xeer-beegtida.
- Musqulaha

**2. FUDUDEYNTA IYO HABABKA KAALMADA IYO ADEEGYADA**

Waaxda Garsoorka waxay aqoonsan tahay waajibkeeda ah inay sameyso fududeyn ku haboon iyo inay diyaariso hababka kaalmada iyo adeegyada si loo hubiyo helitaanka xiriir wax ku ool ah iyo ka qayb qaadashada dadka naafada ah oo xiriirka la leh nidaamka maxkamadda. Waa mudnaan sare ee Waaxda Garsoorka inay hormariyaan si degdeg ahna ay ku helaan kaabayaasha iyo adeegyada ku haboon ee laga heli karo aqalka maxkamadda. Dhanka kale dadaal kasto oo macquul ah waa la qaban doonaa si loo fududeeyo loona diyaariyo hababka kaalmada iyo adeegyada si loo hubiyo helitaanka xiriir wax ku ool ah iyo ka qayb qaadashada dadka naafada ah oo xiriirka la leh nidaamka maxkamadda.

Fududeyntaas waxaa lagu bixin doonaa kharash la'aan. Xaalada. Xaaladaha intooda badan, bandig caddaynaya xaaladda naafanimada looma baahna. Tusaalooyinka fududeynta la siin karo waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

- Turjumaano tayo leh ee luqadda calaamadaha iyo kuwa afka looga hadlo.
- Ageeyada koobi ka sameynta oo isla markiiba laguu sameynayo.
- Qalabka dadka ka caawiya maqalka.
- Bixinta waraaqaha rasmiga ee maxkamadda ayagoo ku qoaran far waaweyn iyo ayagoo ku qoran qaabka Braille- ka loo yaqaan.
- Cajaladaha, qalabka wax lagu duubo iyo cajaladaha kumbuyuutarka (computer).
- TTY: Maine Relay 711, iyo teleefonada codka wayneeya.
- Diyaarinta qaab lagu hubiyo in loo ogolaado eeyaha adeegga u qabta dadka naafada ah inay la joogaan milkiilahooda xilli walba.

Waaxda Garsoorka waxey kaloo diyaarin kartaa waxii fududeyn macquul ah oo loo baahanyahay si dadka naafada ah ay si buuxda uga qayb galaan una xaadiraan hawlaha maxkamadda.

**3. KAABAYAASHA DHAQAALAHA**

Waaxda Garsoorka waxay si firfircoon u dabagli doontaa kaabayaasha dhaqaalaha eel agama maarmaanka ah waxayna si dadaal leh ugu shaqeyn doontaa si loo baabi'iyo dhamaan caqabadaha dadka naafada ah horyimaada.

**4. QAABKA LOO CODSADO FUDUDEYTA GUUD**

Fududeynta diyaar ayey ahaan doontaa mana u baahna wax codsi ah markast oo ay suuragal tahay. Marka lagama maarmaan ay noqoto in codsi la sameeyo, qaabka soo socda waa in la raacaa:

a. Codsiga fududeynta waxaa loo soo gudbin karaa karaaniga maxkamadda dacwaddaada lagu eegi doono.

b. Dhamaan codsiyada fududeynta waa inay tilmaamaan fududeynta loo baahanyahay, iyo sababta codsigaas loo soo jeediyay hadii ay sababtaasi muuqan.
c. Diidma kasto ee codsiga fududeynta oo ka timaada qaali ama mas'uul ka tirsan maxkamadda waxaa la soo raacin doonaa bayaan qoraal ah oo qeexayay sababta diidmada.

**5. SHAQAALAHA GUDIGA XEER-BEEGTA EE NAAFADA AH**

a. Qaaliga iyo shaqaalaha kale ee maxkamadda waa inay sameeyaan diyaargarow kasta oo lagama maarmaan ah si loogu fududeeyo xubnaha gudiga xeer-beegta ee naafadaha ah, si loo xaqiiyo xiriir iyo ka qaybgal wax ku ool ah dhamaan marxaladaha kala duwan ee u yeeridda, shirarka hanuuninta, iyo wadatashiga ee xeer-beegta.
b. Dadka xaqa u leh oo loogu yeero inay qabtaan hawsha xeer-beegnimo waa laga cafin karaa hawshaas sababo la xiriira naafanimada awgeed hadii ay awoodi kari waayaan inay gutaan waajibkooda marka lagu caawiyo wixii fududeyn oo macquul ah.

**6. SHURUUDAHA QAREENKA**

Qareennada ku jira kiiska waa inay maxkamadda ula soo socodsiiyaan sida ugu dhaqsaha badan marka ay ogaadaan in qof naafa ah oo uga baahan fududeyn maxkamadda uu ku jiro dacwadda.

**7. HABKA CABASHADA**

Waaxda Garsoorka ayaa qaadatay Habka Cabashada, foomka Dacwadda ku saabsan Fududeynta/ Cabashada si ay u hirgeliso siyaasadda ku xusan halkaan.

a. Nuqul ogeysiiska maxkamadda ee waafaqsanaanta, Habka Cabashada iyo foomka Dacwadda ku saabsan Fududeynta/ Cabashada waa in laga helaa xafiiska karaani kasta waa in la siiyaa qof kasta.
b. Maxkamaddu waa inay sameysaa dadaal kasta oo macquul ah si loo xaliyo cabashooyinka lana qanciyaa qofka naafada ah.

Ma jiraan wax ku xusan siyaasaddaan oo loo fasiro karo ku soo rogid xadeyn ama burin xuquuq iyo nidaam lagu siiyay dadka naafada ah sharciga degmada, gobolka ama federaalka.

Effective 5/5/00
Rev. 12/15/15
Somali